# Tallaalada COVID-19 ee loogu talagalay Dhalinyarada

## Fahmidda Oggolaanshaha Ku saleysan Ururada Bulshada ee u Adeega Dhallinyarada

Vaccinate WA
CovidVaccineWA.org

Washington State Department of Health (Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington) waxa ay ku talineysaa in dhammaan dadka 6 bilood sano iyo kaweyn ay qaataan tallaalka. Iyadoo noocyada badan ee oggolaanshaha ay sharci ka yihiin sida uu dhigaayo sharciga gobolka Washington, tallaal bixiyaasha badankooda waxa ay ubaahan yihiin oggolaanshaha waalidka/qof mas'uul ka ah si ay u siiyaan tallaalka dhalinyarada. Tani waxa ay diiwaan gelineysaa noocyada oggolaanshaha la oggol yahay sida uu dhigayo sharciga gobolka, iyo sida ururkaada uu u caawin karo dhallinyarada (gaar ahaan kuwa aan haysan guri) inay qaataan tallaalka kadhanka ah COVID-19.

### Dadka waaweyn ee siin kara oggolaansho dhalinyarada:



- Waalidka
- Qof mas'uul kaa ah ama ilaaliyaha sharciga ah
- Waalidka kusoo koriyey ama qof kale oo ay maxkamad u oggolaatay inuu oggolaansho ka bixiyo daryeelka caafimaadka ee ilmo ku jira goob ka baxsan guriga (Cutubka 13.32A ama 13.34 Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Washington ee Dib-loo-eegay))
- Qof la siiyey oggolaansho saxiixan si uu ugu sameeyo go'aannada daryeelka caafimaadka iyaga
- Qof qaraabada ah oo mas'uul ka ah daryeelka caafimaadkooda
- Kalkaalisada iskuulka, la-taliye, ama isku xiraha dadka guri la'aanta ah (haddii lagugu qeexo inaad tahay qof guri la'aan ah sida ku xusan sharciga federaalka McKinney-Vento Homeless Education Act)*

### Dhalinyaradu waxa ay iyaga isasiin karaan oggolaanshaha haddii:



- **Ay si sharci ah xor uyihiin.** Ay jiraan 16 sano ama kaweyn yihiin oo ayna xareysteen dacwad oona loo oggolaaday inay xor ka yihiin waalidiintooda.
- **Ay guursadeen qof yar oo la xorreeyey ama qof weyn.**
- **Bixiyaha tallaalka ayaa go'aamiya inay yihiin qof yar oo qaangaar ah** sida kucad Mature Minor Doctrine (Mabda'a Dadka Yaryar ee Qaangaarka Ah).**

### *Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan oggolaanshaha ayadoo la isticmaalaayo sharciga McKinney-Vento:

Sida ku xusan sharciga gobolka, kalkaalisooyinka iskuulka, lataliyaasha iskuulka, iyo isku xirayaasha ardayda guri la'aanta ah ayaa loo oggol yahay inay siiyaan oggolaanshaha tallaalka ee dhallinyarada ama dadka yaryar ee hoy la'aantu hayso (sida lagu qeexay sharciga hoos imaanaaya federaalka [federal McKinney-Vento homeless education act – Webseed kaliya ah Af-Ingiriisi]) qofkaas oo aan si muuqata u hoos imaaneynin mas'uuliyadda waalidka ama qof mas'uul ka ah.

**Lifaaqa ilaha:** National Center for Homeless Education, *Kaalmeynaya Waxbarashada Ardayda Aan Qofna Lasocon ee Wajahaya Hoy La'aanta,* https://nche.ed.gov/wp-content/uploads/2018/10/youth.pdf - Webseed kaliya ah Af-Ingiriisi

### **Xog dheeraad ah oo kusaabsan Mature Minor Doctrine:

Tallaal bixiyaasha qaarkood waxa ay u oggol yihiin dadka aan qaangaarin inay siiyaan oggolaansho ansax ah sida hoos imaaneyso sharciga “Mature Minor Doctrine” haddii ay fahmi karaan ama qadarin karaan cawaaqibka ka imaanaayo habraaca daaweynta.

Marki ay timaado go'aaminta in bukaanku yahay qof qaangaar ah oo yar, tallaal bixiyaashu waxa ay qiimeyn doonaan da'da qofka yari, garaadka, qaangaarnimada, tababarka, waaya aragnimada, madax bannaanida dhaqaale ama intaa la'aanteed, anshaxa guud ee ka qof weyn ahaan iyo ka madax bannaanida maamulidda waalidka.

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:** Booqo **COVIDVaccineWA.org ama 1-833-VAX-HELP**, kadibna riix # si aad uhesho caawimaad luuqadeed.

## Tallaal bixiyaashu waxa ay ku aqbalaan oggolaanshaha dhawr siyaabood oo kala duwan.

- Oggolaanshaha afka ah waa la oggol yahay (taleefan lagu sheegay ama si toos ah)
- Oggolaansho qoran (foom)
- Qaarkood waxa ay ubaahan yihiin labadaba oggolaansho qoraal ah iyo afkaba.
- Oggolaansho toos ah oo ka imaanaya qof weyn ee oggolaanshaha siinaya iyaga.

## Sida looga caawiyo dhalinyarada inay qaataan tallaalka

- ☐ **Isticmaal kala shaandheeyaha/filtarka xulashooyinka ee ku yaallo Vaccine Locator (Meeleeyaha Tallaalka) ([vaccinelocator.doh.wa.gov](vaccinelocator.doh.wa.gov)) ama wac bixiyaha tallaalka si aad u ogaato nooca oggolaansha ee uu aqbalo tallaal bixiyaha.** Xulashooyinka kala Shaandheynta/Filtarka Ufiican Dhallinyarada oo ku yaallo Vaccine Locator ayaa kaa caawin doona inaad hesho tallaal bixiye kaala shaqeyn doona xaaladaada. Ka eeg "Ka caawi dhallinyarada inay udiyaar garoobaan nooca oggolaanshaha ay rabaan in la siiyo" hoos tilmaamaha isku diyaarinta ballanta tallaalka.
- ☐ **Raadi goobaha tallaalka ee aqbalaya iska imaatinka ballanta lahayn ama wac si aad uqabsato ballan.** Tallaal bixiyaal badan waxa ay dalbadaan oggolaanshaha waalidka ama qof mas'uul ka ah si loogu qabto ballanta onlayn ahaan.
- ☐ **La xariir dugsiyada si aad u hesho xog kusaabsan oggolaanshaha.** Haddii dhalinyarada aad la shaqeyneyso ay ku habboon yihiin shuruudaha sharciga ee McKinney-Vento (ka eeg qeybta hore wixii xog dheeraad ah), waxaad kala shaqeyn kartaa kalkaalisada dugsiga, lataliyaha dugsiga, ama isku xiraha ardayda hoy la'aanta ah si ay u siiyaan oggolaansho. Tallaal bixiyaasha qaarkood waxa ay u baahan yihiin qof weyn inuu joogo marki tallaal la qaadanayo. Ka xaqiiji ama kala shaqee shaqaalaha iskuulka wakhti hore si loo go'aamiyo cidda u raaci doonto ardayga ballanta tallaalka.
- ☐ **Ku marti geli moobeelkaada dhacdada tallaalka ama ku hag dhalinyarada rug caafimaad oo jirtay.**
  - ☐ Codso dhacdo Care-A-Van ah – webseed kaliya ah Af-Ingiriisi. WA State Department of Health Care-A-Van (doh.wa.gov/CareAVan) waxa ay adiga kuu keeni karaan tallaalada. Maalgelinta waxaa loo heli karaa ururada bulshada ee martigelinaya ee xaqa u leh. Care-A-Van waxa ay aqbalaan dhammaan noocyada oggolaanshaha lagu sharraxay bogga hore ee dukumiintiga, oo ay ku jiraan oggolaanshaha carruurta yaryar ee qaangaarka ah.
- ☐ **Ka caawi dhalinyarada inay udiyaar garoobaan nooca oggolaanshaha ay rabaan in la siiyo:**
  - ☐ Haddii qof weyn loo baahan yahay inuu joogo ballanta tallaalka qofka dhallinyarada ah, kala shaqee iyaga.
  - ☐ Haddii tallaal bixiyuhu aqbalayo oggolaansho qoraal ah, ka caawi dhalinyarada inay daabacdaan foomka oo la saxiixo.
  - ☐ Haddii ay yihiin qof yar oo la xorreeyey ama qof yar oo guursaday qof yar oo la xorreeyey ama qof weyn, ka caawi inay soo uruursadaan dukumiintiyada ku habboon.
  - ☐ Haddii ay helayaan oggolaanshaha iyaga oo isticmaalaya sharciga McKinney-Vento, ha keenaan nuqulka/koobiga sharciga Oggolaanshaha Xog-ogaalka: Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Washington ee Dib-loo-eegay) 7.70.065- Webseed kaliya ah Af-Ingiriisi waxaadna ka muujisaa qeybta gaarka u ah iskuulada. (Lifaaqa sharciga: https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=7.70.065)
  - ☐ Haddii ay doonayaan inay oggolaansho isasiiyaan iyaga oo u maraya Mature Minor Doctrine, ka caawi inay diyaarsadaan dukumiintiyada iyo xogta muujineysa inay ka madax bannaan yihiin waalidiintooda. Tani uma wada baahna dhammaan tallaal bixiyaasha laakiin waa ay ku caawin kartaa. Tallaal bixiyaasha qaarkood maku sameeyaan goobta go'aaminta dadka yaryar ee qaangaarka ah laakiin waxa ay ka aqbalaan dadka yaryar ee qaangaarka ah ee kasocdo tallaal bixiyaashi hore.